# GOLAHA WAKIILADA JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA, GUDIYADA IYO GOLAWAYNAHA

**Kal-fadhigii 38aad fadhigii 2aad**

**28/10/2018**

**Quraanka: -** Md. Ibraahim Caraale

**Gudoonka: -** Gudoomiye Md. Baashe M. Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-**

- Doodda Ajandaha Kal-fadhiga 38aad

**Gudoomiyaha: -** Mudanayaal waxaynu u balansanayn doodda Ajandaha Kal-fadhigan 38aad, Xoghayntu ha u qaybiso Waraaqa Mudanayaasha Doodda is-qorayaa.

Waxaan ku soo dhowaynayaa Mudane C/raxman Yuusuf Cartan.

**Md. C/raxman Yuusuf Cartana** *(03 min, 24 seconds)***:-** Shir-gudoonka iyo Mudanayaasha ASC, anigu leeyahay qodobka Xog ogaal u noqoshada Xaalada dalka waa qodob aad iyo aad u muhiima waana in laga dhigaa mid aynu dood wanaagsan iyo fursad wanaagsan u qaadanayaan.

Xeerarka halkan inoogu qoran waxaan soo jeedin lahaa Xeerka Doorashooyinka ooh awl badan u baahan Golahana horyaala oo bulshadu aad farta inaga inoogu godayso, wuxuu u baahan yahay hawl badan kumana dhamaanayo dood qudha oo Golaha ka dhacda. Marka Xeerkaas waxaan soo jeedin lahaa inuu xaga hore yimaado.

Xeerarka aniga waxay illa tahay inay fiican yihiin siday u qoran yihiin, waan ka baxay, Waad-mahadsan tahay Gudoomiye.

**Md. Siciid Maxamed Cilmi** *(06 min, 16 seconds)***:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha, Shaqaalaha Golaha iyo Marti-sharafta inala joogtaba marka hore waan idin Salamaayaa ASC. Waxaan toos u galayaa doodda Ajandaha.

Gudoomiye anigu waxaan soo jeedinayaa qodobka 9aad ee ku saabsan Wax ka badalka Xeerka Tamarta sida muuqata Wax ka badalka waxaa soo samaysay xeerkana dhowaan baynu ansixinay oo lama dhaqangalin oo laguma shaqayn, waxayna ku wanaagsanayd markii ilaa lix bilood shaqaynayo oo lagu shaqeeyo lana arko dhibaatooyinka iyo caqabadaha ku jira lagu sameeyo wax ka badal oo la inoo soo gudbiyo, sidaa darteed waxaan soo jeedinayaa in Xeerka AJandaha laga saaro madaama arrimo farabadan oo muhiima oo Xeerar dalku aad ugu baahan yihiin ina horyaalaan. ***Seconded 7 Mudane.***

Qodobka Xog ogaal u noqoshada xaalada dalka waxaan soo jeedinayaa inuu noqdo qodobka kowaad ee Goluhu kawada hadlo madaama arrimo badal dalka ka taagan yihiin.

Qodobka labaad ee ah Xeerka Maydhista lacagta oo laga dooday una taagan in loo codeeyo, laakiin sida Gudidda dhaqaalaha iyo Shir-gudoonkuba ka warhayo qoraal farabadana la inooga soo gudbiyay, Xeerkaas markii dib u eegeen Bangiga Dhexe iyo khubaro kala shaqaynaysay madaama xeerka aan gudaheena oo kaliya looga baahnayn ee uu yahay Xeerkii ay inagu qiimaynayeen Bangiyada la macaamilaya Bangigeena loona baahan yahay inuu international standers-ka Maydhitaana lacagta uu dabaqo, waxay soo saareen laguna wargaliyay Gudiyada Dhaqaalaha gaar ahaan intayadii tagtay Nairobi ee Bangiga Aduunka isa soo arkeen in Xeerkan aynu haynaa ay ka maqan yihiin tiirar muhiima oo aduunyadu tixgaliso la'aantooda aan Bangigeena lala macaamili Karin.

Sidaa darateed, Bangigu wuxuu noo soo gudbiyay Shir-gudoonkuna ogyahay Qodobo muhiima in Xeerka lagu soo daro, iyado Xeerkii laga dooday uuna codayn u taagan yahay si la isula jaanqaado waxaa loo baahan yahay inta la soo galiyo aan Golaha dib ugu soo celino oo Goluhu dib uga dooddo madaama aan Qodobada cusub markii hore laga doodin, markaa waxaan soo jeedinayaa in laga saaro Codaynta oo lagu qoro Gudidda Dhaqaalaha.

Waxaa jira maalmahan go'aan ay gaadhay Wasaarada Isgaadhsiinta oo ku saabsan qalab ay keenayso oo khubaro badan oo ka hadashayna sidaad maqasheen sheegayaan inuu yahay Qalab dhagaysi oo kaliya, Dastuurka Dalkuna Gudoomiye iyo Mudanayaal Qodobkiisa 30[aad] wuxuu leeyahay "qofna lama faragalin karo qoraaladiisa gaarka ah, waaraaqihiisa boosta ama xidhiidhkiisa Isgaadhsiineed" sidaa darteed waxaan soo jeedinayaa in Arrintaas lagu soo daro Ajandaha oo gaar ka ah in masuuliyiinta loo yeedhayo in Wasiirka Isgaadhsiinta Golaha looga yeedho si wax looga waydiiyo, arrintaas oo dadkii iyo asxaabteenii kaleba ka qaylinayaan. Waad Mahadsan tihiin.

**Md. Cali X. Maxamed Muuse** ***(48 seconds)*****:-** Gudoomiye Ajandahani wuu ka duwan yahay ajandayaashii hore wuxuuna u badan yahay Wax ka badal iyo Kaabis, Gudoomiye Xeerarka halkan ku qoran intooda badan maanu arag gabigoodaba sida Xeerka Maydhista, Xeerka Macdanta iyo Wax ka badalka Gobolada iyo Degmooyinka markaa maxaanu ajandaha ku ansixinaa hadaanan aragba Xeerarkii horta ha la keeno Xeerka.

**Md. Rashiid Maxamed Ismaaciil** ***(01 min, 37seconds)*****:-** Gudoomiye iyo Mudanayaal waan idin salaamayaa, aniga waxay illa tahay in ajandaha ay ka maqan yihiin laba Xeer oo ah in lagu soo daro kuwaas oo kala ah:-

- Ansixinta Miisaaniyadii Qaranka ee Sanadka 2019ka iyo

- Xisaab Xidhkii sanadkii 2017kii

Xeerka Doorashooyinka waa kaas Golihii fadhiyee Xeerkaas qabyo maaha dadkii waxaa lagu odhanayaa Golaha ku fadhiya, Xeerku qabyo maahee qodob baa qabyo ah waana kan ah in dadka la tiriyo, dee dawladu ha tiriso Goluhu ma tiriyee, anigu Xeerka qaabka loo soo dhigay waan ka dayn lahaa.

**Md. Siciid Warsame Ismaaciil** ***(04 min, 58 seconds)*****:-** Shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo Saxaafada waxaan ku salaamayaa Salaanta Islaamka, waxan aynu ka hadlaynaa waa ajandihii kal-fadhiga 38aad ee Golaha, Waxaan marka hore taageersanahay Xog ogaal u noqoshada sida Xildhibaan Cartan u soo jeediyay.

Waxaan soo jeedinayaa in laga saaro Wax ka badalka Xeerka Tamarta madaama aynu dhowaan ansixinay laguna shaqayn waxaad moodaa inaanu ku dhamaystirnayn processkii Xeerarka, markaa Xeerkaas ha laga saaro, waxaana qabaa in kal-fadhigan Goluhu qaadi Karin Xeerkaas.

Xeerka Hawlgabka iyo xaqsiinta waxaan qabaa inaanu Xeerkan iman Karin iyadoon la keenin Xeerkii Ciidanka iyo Daraja siinta, inta Xeerkaasa la helayona kan lama samayn karo, waana beedkii digaagada laga horaysiiyay in la helo.

Sidoo kale Waxaan taageersanahay in arrintaas qalabka dhagaysiga looga yeedho Wasiirka Isgaadhsiinta si wax looga waydiiyo, waayo qalabkaas dadka lagu dhagaysanyo dastuurka ayay ka hor imanaysaa oo xuquuqdii asaasiga ahayd ee qofka ayay wax u dhimaysaa, markaa Ajandaha ha lagu soo daro.

Waxa kale oo sanad walba aynu Miisaaniyada ku ansixinaa Sanduuq SDF oo Miisaaniyaada qayb ka ah, waxaana la inoo keena isagoo figures ah, laakiin Golaha waxaa looga baahan yahay wax tarkii iyo wax qabadkii wajigii hore warbixintii laga sameeyay Golaha la keeno si aynu u hubino in si effective loo maamulay iyo sida looga faa'iday isla markaana loo saaro Gudi Gobolada oo dhan ka kooban, markaa qiimaynta arrintaas waa in Ajandaha lagu soo daro, inta kale waxaan ku raacsanahay sida Xildhibaanadu sheegeen.

**Md. Xuseen Axmed Caydiid** ***(05 min, 14 seconds)*****:-** Shir-gudoonka, Mudayaasha, Marati sharafta iyo Saxaafada marka ASC, Gudoomiye waxaan qabaa qodobkaas Xog ogaal u noqshada halkaas uu ku yaala inuu ka haboon yahay waxaana ka horeeya Warbixinaada Shir-gudoonka iyo Gudiyada waayo marka warbixinada Shir-gudoonka iyo Gudiyada la helo ayaa la gali karaa waayo waxaa dhici karta inay ka soo baxdo inaynu xisaabta ku darsano, marka sidaas ay iminkaba isu hoosyaalaan aynu u dayno.

Maalmo dhowayd waxaynu maqlaynay in Wasaarada Maaliyadu cashuuro kordhisay bilaydhka taarikada inay badashay oo kii hore qiimihii lagu qaadan jiray mid ka badan ay soo saartay, baabuurtii hore ee ilaa sagaashamaadkii wixii qaatayna la yidhi dib u

qaata oo lacagtii hore mid ka badan oo cashuur ah la yidhi bixiya, maaha taasi wax dadka qabata, hore ayaa mar loo badalay taarikada oo marka tan privateku ahayd bilaydh madaw wax lacag iyo wax dadka lagu khasbayna may jirin oo meesha way ka baxeen markay gaboobeen, waayo qofkii bilaydh number gaadhi u qaatay wuxuu u qaatay inuu la dhamaysto gaadhiga laakiin in si hawl yar marba loo badalo maaha, MARKAA WASIIRKA MAALIYADA HA LOO YEEDHO SI LOO WAYDIIYO HALKUU AWOODDAAS KA KEENAY.

Laba Xeer oo Mudanayaashu ay ka hadleen in laga saaro ayaan la qabaa labadaas xeer oo kala ah Xeerka Hawlgabka iyo Xaqsiinta Ciidamada iyo Wax ka badalka Xeerka Tamarta sidaaas Mudanayaashu u soo jeediyeen ayaan la qabaa.

Xeerka Guud ee Doorashooyinka Gudoomiye Xeerkaas qabyo farabadan baa ka muuqata, waayo markasta oo doorasho inagu soo socoto geedi socodka marwalba Xisbiyada iyo komishanku way kawada hadli jireen oo wixii laga heshiiyo oo xeer qurxinaya geedi socodka waa la soo gali jirin, iminka maanu arag meel laga wada hadlay, warka ka soo baxaya madaxtooyada iyo saxaafadana waxaa loo tirinayaa in Xeerkaas Golaha Wakiilada horyaalo oo haday saami qaybsi tahay iyo wax walba uu Golahani uu ka masuul yahay.

Markaa hadii aad wiiga dambe soo dhigtaan iyadoo saami-qaybsigii ka maqan yahay iyo iyado kootadii aan talo sharci loo doonin dee waxay noqonaysaa inaynu isku xanibno wakhti waa inagu socda oo doorashadii way soo dhowaanaysaa, markaa waxaan qabaa Xeerkaas Xukuumada wax badan qabyadiisu ku maqan tahaye intii inaga la inaga eegi lahaa inaynu ku maqanahay oo u maqanahay aynu ku wargalino in hadii tahay Saami-qaybsiga oo Maxkamada sharci loo waydiiyo iyo kootada haday tahay meelahaas oo dhami ay qabyo tahay oo Xukuumada aad Shir-gudoon ahaan ku celisaan oo iyadu ka masuul tahay. Intaasan kaga baxay WSC.

**Marwo. Baar Siciid Faarax** ***(02 min, 47 seconds)*****:- Shir**-gudoonka iyo Mudanayaasha ASC, aniga Ajandaha waxaan ka dhigi lahaa:-

- Xog ogaal u-noqoshada Xaaladda Dalka.
- Ansixinta Miisaaniyada Sanadka 2019ka waayo wakhti badan ma hadhsana waana la jooga wakhtigeedii.
- Saami-qaybsigii Golaha Wakiilada iyo Kootadii, maalin dhowayd sidaad maqlayseen Madaxweynuhu wuxuu ka dhawaajiyay in Saami-qaybsiga Golaha Wakiiladu ay ku shuqul leeyihiin, umada maaha in wax la iska saaro aanay awood u lahayn, markii hadaynu arrintaas awood u leenahay waa inaynu wax ka qabanaa, hadii kale waa inaad Madaxweynaha runta u sheegtaan Shir-gudoonkow ilayn umadii inagay inoo haysataaye.

- Waxaa jiray Xeerar muhiima oo Ajandayaashii hore inaga qabyoobay iyana ha lagu soo daro Ajandahan.
- Qalabkan dhagaysiga ee la sheegay aniga hore uma maqan oo qofkii ugu dambeeyay oo maqlaan ahaye isna ha laga hadlo oo Wasiirka ku shuqul leh ha loo yeedho, umada maaha in madaxa la isu galiyo dalka ilayn Military ma haystee.
- 24 saacadood waxaa la kordhinayaa Cashuuro farabdan oo aynaan ogayn oo kuwaas taarikadu ka mid yihiin, kuwa dadka ganacsatada la saaray, markaa Cashuurta Wasaarada Maaliyadu iska korodhsanayso waa in Wasiirka Maaliyada looga yeedho si wax looga waydiiyo awoodaas halkuu ka keenay.

**Md. Maxamed Faarax Qabile** ***(07 min, 24 seconds)*****:-** horta sida xildhibaandii iga horeeyay sheegaan waan la qabaa Xog ogaal u noqoshada in sida Xildhibaan Xuseen Caydiid sheegay laga dhigo sidiisaana u waafaqsanahay.

Qodobka wax ka badalka Xeerka Ciidanka Booliiska, Xeerkaasi Golaha si aqlabiyad oo dastuurka waafaqsan buu Golaha uga baxay mudadiisiina wuu raagay in badan buu inagu soo noqnoqday, markaa Xeerkaa sidiisaba in laga saaro ayaan soo jeedinayaa Ajandaha.

Xeerka Maydhista Lacagta inaanu si dhib yar Golaha uga bixin sidii Xeerar hore oo lagu hakadu oo akhris kale la galiyo si loo baaraan dego si aanay Xeerarku inooga noqon sidii Xeerkii Kufsiga oo ina ceebeeyeen.

Wax ka badalka Xeerka Tamarta waxaan la qabaa Xildhibaanadii iga horeeyay shalay ayuubuu Golaha ka baxo nuqsaan iyo dhaliilo uu leeyahayna lama ogaanin rabitaanka Wasiirkana si laab la kac ah yaynaan ugu raacine waa in Xeerkaas shaqayee marka hore.

Qabyo Qoraalka Xeerka Sahminta iyo soo saarista Shidaalka, Xukuumadu si ikhtiyaara bay isaga gashay oo tidhi heshiisba maanu galin, waxa weeye in la keeno heshiisyadii carabiga ahaa ee Xukuumadu gashay iyaga ka muhiimsan inta la galayo Qabyo qoraalka Xeerkaas waana in sida Qodobka 53aad ee Dastuurku dhigayo la keenaa heshiiskii la galay galina mayno Xeerkaas, si xaraana bayna sahmintii dalka uga dhacday.

Waxa kale oo aan is dultaagayaa, wuxuu yidhi **"maxay leeftaa maba lulatee"** maxaynu dakhli shidaal ka eeg heshiiskii sahmintaynu haynbe, markaa kaasna meesha ha laga saaro.

Arrinta dhagaysiga la sheegayo, sida Qodobka 30aad ee Dastuurku waa mabaa'diida guud ee Dastuurka oo sida Diinta Islaamka waa arrimaha aan la faragalin in shu'uunu daakhiliga qofka la galao, iyadana meesha ha laga saarao, malaha Somaliland Dimuqraadiyada inay muujiso ayay si cad ugu badheedhay.

Sida uu dhigayo Qodobka 14aad tacriifada kordhaysa waxaa loo eegayaa maslaxada umada, waxaa jira Wasaarada Maaliyadu talaabooyin badan oo ay qaaday oo ku kordhisay cashuurta, arrintan bilaydh lambarkan la sheegayo laba siyaabood baa loo eegayaa, horta waa inaynu ogaano siyaasada ay xukuumadu uga jeedo badalista taarikada, marka labaad cashuur sanadeedkii ku waajibtay baabuurta waa la qaaday iyadoo la qaaday in mid kale oo wasaarada ah in la iska fuliyo oo talaabadaas Golahana aanu ogayn oo xog ogaal u ahayn ay hirgasho, arrimaha nabadgalyada wuu khusaynayaa, gobol gobol iyo qabiil baa ku cad, arrintaasi waa mid aan la fahmin, markaa Waa in Wasiirka Gaadiidka loo yeedho sidoo kale waa in la joojiyo oo Golahan soo saaro joojin lagu muujinayo dareenka iyo Golahan awoodihii uu lahaa.

**Md. C/raxman Cismaan Caalin** ***(03 min, 35 seconds):-*** Bismilaahi RR, Gudoomiye anigu laba arrimoodba waa in is dultaagayaa, tan hore waa Warbixinada, Warbixinta Shir-gudoonku waa macquul, laakiin Warbixinta Gudidda Joogtada waxay qabata ma jirtee wakhtiga ha inaga lumina iyada iyo tan Gudiyadaba.

Waxaan gacan siinayaa qodobka xog ogaal u noqoshada xaalada dalka, laakiin laba dooddood oo aynu galnay oo kala ahaa tii sixir bararka iyo mid ahayd xog ogaal u noqoshada xaalada dalka labada midna waxba kamaynu soo saarin, inaga isu bognay oo is dhagaysanay, markaa kuwaas hore oo kale yaanay inaga noqon ee wax dalka wax u tara aynu ka soo saarno.

Yaynaan raacin Wasiirada markay xeerarka akhriyaan dantooda markay ka arki waayaan inagu soo celiyaa, Markaa labada Xeer ee Wax ka badalka Xeerka Tamarta iyo Wax ka badalka Xeerka Booliiska waxay inagu soo celiyeen markay dantoodii ka waayeen oo waxay doonayaan inaynu ugu darno, markaa Labada Xeerba waa in Ajandaha laga saaro ***Seconded 8 Mudane***.

Waxaan ku taageersanahay Mudane Siciid Cilmi Xeerka Maydhista Lacagaha, waana qabaa in Xeerkaas talooyinka ka maqan lagu biiriyo, waxa kale oo Mudane Rashiid ku raacsanahay soo jeedintiisii ahayd Miisaaniyad Sanadeedka iyo Xisaab Xidhka in lagu soo daro Ajandaha.

Waxaan soo jeedinayaa in la soo qadimo Xeerarka dalku u cadiban ee muhiimka aad u baahi badana loo qaboyahay oo kala ah:-

1. Xeerka Nidaamka Garsoorka.
2. Xeerka Doorashooyinka
3. Xeerka Diiwaangalinta oo isna doorashooyinka khuseeya.
4. Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka

Midna Mudane Siciid Warsame baan la qabaa taas oo ah Xeerka Hawlgabka oo aan la samayn Karin haduu maqan yahay Xeerkii Ciidamadu oo masterkii ah, sidii Barigii aynu

samaynayn Xeerkii Baananka Islaamiga ah waxaa maqnaa Xeerka Bangiga Dhexe waynu joojinay oo marka hore waxaynu samaynay Xeerkii Bangiga Dhexe oo aan la aantiis la samayn karayn kii Bangiyada Islaamiga ah, markaa Xeerkan hawlgabka Ciidamaduna waa la mide side baynu u samayn karnaa hadaanu jirin Xeerkii Ciidamadu.

**Md. Xasan Xuseen Shide***:- (02 min, 03 seconda)* Shir-gudoonka, Mudanayaasha iyo Marti-sharafta dhamaan ASC, salaam ka dib inkasto dad badani ka bax-baxeen waxaynu ka doodaynaa waa Ajandaha kal-fadhiga 38aad oo ay ahayd in lagu ekaado. Anigu qodobadii aan ka hadli lahaa xildhibaanadii iga horeeyay baa ka hadlay, waxaan ku raacsanahay soo jeedinta Xog ogaal u noqoshada Xaalada dalka inaynu ugu horeysiino oo iska waraysano.

Xeerarkana, Xeerka Guud ee Doorashooyinka inaynu ugu horaysiino, waayo, dadku si gaar ah ayay inoo soo eegayaan wixii inaga began inaynu is dhaafino oo kaas doodiisa dhamayno, qodobada kale waxaan ku raacsanahay xildhibaanadii iga horeeyay.

Labada qodob oo ajanadaha ka baxsan oo Xildhibaandu ka hadleen baan jeclahay inaan ka hadlo, Taarikada aduunyada oo dhami waa magaalo magaalo oo international, security ahaan baana looga dhigin oo in gaadhi dalka laga baadho way adagtay laakiin marka magaalo laga laga dhigo way fududaanaysaa, markaa sidii siyaad barre yaynaan kacaanka ka dheerayn oo dimuqraadiyad aynu maqanay isku sii qaadin. Qalabkan dhagaysigu waa security-ga dalka qayb ka mid ah laba qof oo sheekaysanaya lama dhagaysanayo ama lacag isu diraya lama basaasayo dee, markaa waxyaabaha soo kordhaya yaynaan ka hor imana oo dimuqraadiyad iyo dastuurka ayay ka hor imanaysaa caqliga ma gashee. Dhamaantiin waan idin salamaayaa waana ka baxay.

**Gudoomiyaha:-** Mudanayaashii Doodda is-qoray intaasay ahaayeen oo dooddii way dhamaatay, Xoghaynta soo ururinaysaa barito waxaynu u codaynaynaa Ajandaha doodda ka soo baxa, fadhigii Maanta sidaasuu inoo xidhan yahay.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
-----------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**
-----------------------------------------------